

Guryeynta/ Gudaha gurigaaga dhexdiisa

- Qoondaynta guryeynta mudnaanta 2
- Meesha Joogid
- Joogidda Meel dhow
- Taageerada laga helo lataliyaha shakhsi ahaaneed/shaqaalahabulsheed ee ku saabsan guryeynta
- Diyaarinta Gunnada Guriga (Home Allowance) ee lagu soo iibsado waxyaabaha ugu muhiimsan sida laysinka telefishinka, khadka internetka ee WIFI, jalaska albaabka ee Ring iyo Hawo wax ku kariyaha (Air fryer)

Adiga oo ku jira bulshadaada

- Tigidhada baska ee bilaashka ah
- Kaa taageeridda in aad horumariso Xirfadahaaga Nolasha Madaxbannaan
- Kaa caawinta waraaqaha aqoonsiga sida baasaboorka, laysinka baabuurta iyo furashada akown bangi
- Gargaar kaa taageera casharrada baabuur wadista marka habboon—ilaa 10 cashar
- Talo iyo taageero lagaa siiyo habsocodka codsashada guryeynta, dheefaha ama lacagaha cayrta iyo lacagaha madaxbannaanida shakhsi ahaaneed
- Kaa caawinta in aad fulisato danta hiwaayadda/ muusikada/ isboortiga
- Waxaad codsan kartaa in aad aragto macluumaad kastoo aan adiga kaa hayno
- Is qorista maktabadda iyo helitaanka taageerada caafimaadka iyo wanaagqabka ee lagu bixiyo Xarun dhexaadada Bulshada
- Haddii aad rabto talo iyo taageero madaxbannaan waxaad xaq u leedahay Qareen (Advocate) ka socda adeegga NYAS (Adeegga Qaran ee Qareenimada Dhallinyarada)
- Mashaariicda ka dhex jira Kawnsalka Xaafadda Hartlepool - Mashruuca Farshaxanka
- Xarun dhexaadka Dadka yar - Dariiq heleyaasha (Pathfinders)
- Shaqaale Bulsheed/Lataliye PA oo u go'an carruurta UASC - Carruurta iyo Dadka Yar ee Magangalyo Doonka ah ee Aanan lala soconin



Hartlepool
Borough Council

Baaqayaga Maxalliga Ee Adiga Kugu Socda

Baaqa maxalliga waxaa lagu helaa macluumaad la siiyo dadka ka baxa daryeelka dawladda oo ku saabsan taageerada ay iyagu filan karaan. Baaqan ku saabsan adeegyada taageerada ee laga helo Hartlepool waxuu weliba yahay waxa dadka ka baxa daryeelka dawladdu ay xaq uga leeyihiin gebi ahaan waddanka.

Miyaad og tahay in Lataliyeyaashayada Shakhsi ahaaneed ay hormuud u yihiin dhinacyo gaar ah oo adiga si ka fiican kuu taageerikara.

Kirsten - Horumarinta Adeegga, Guryeynta iyo Qaangaarka

Jodie - Waaldiiinta Khibrad u leh Daryeelka

Cath - Caafimaadka Maskaxda

Joanne - Waxbarashada

Wendy - Xabsiyada iyo Caddaaladda Dhallinyarada

David - Siyaasadaha iyo Nidaamyada

Tina - Horumarinta Adeegga, Caafimaadka iyo Isticmaalka xun ee Maandooriyaha

Haley - Carruurta Magangalyo Doonka ah ee Aanan lala soconin (UASC)

Neil - Nafooyinka

ANNAGU WAAN

KUGU KALSOONAAN DOONNAA

KA A CAAWIN DOONNAA

U QORSHAYSIGA MUSTAQBALKAAGA

KU DARYEELI DOONNAA

Caafimaadka iyo Wanaagqabka

- Helitaanka Taageerada Dabiibeed ama terabiyeed
- Ku siiya Baasaboorka Caafimaadka (Health Passport)
- Taageero lagaa siiyo helitaanka talada iyo daawaynta caafimaadka oo aad ka hesho takhaatiirta caadiga ah, takhaatiirta ilkaha iyo adeegyada kalee caafimaadka
- Kaarasha firfircoonida ee bilaashka ah ee lagu galo xarumaha firaqada ama jimicsiga ee magaalada
- Shaqaalaha isticmaalka xun ee maandooriyaha ee goonida ah - barnaamijka hawlgelinta siyaadada ah

Adiga Codkaaga

- Shaqaaleyaasha Ka qaybqaadashada ayaa adiga kaala hadli kara fursadaha iyo waxa aad ka qayb geli karto
- Waxaad ku biiri kartaa fursadaha dhallinyarada ee gobolka iyo qaranka
- Ku biir kooxaha isbeddello togan u keena carruurta ku jirta daryeelka dawladda ama ka baxaysa daryeelka
- Barta internetka barnaamijka Dariiq heleyaasha (Pathfinders)

Taageeradayada adiga kugu socota

- Shaqaalahaaga bulsheed /lataliyahaaga PA ayaa adiga ku arki doona inta jeer ee aad u baahato ilaa aad 18 jir noqoto
- Shaqaaleyaasha bulsheed iyo lataliyeyaasha shakhsi ahaaneed ayaa diyaar u ahaan doona in ay adiga ku caawiyaan waqti kastoo aad iyaga u baahato ilaa da'da 25 jir
- QORSHAHA DARIQA LA MARO - Shaqaalahaaga bulsheed ama lataliyahaaga shakhsi ahaaneed ayaa adiga kaala shaqayn doona in aad Qorshahaaga Dariiq la maro (Pathway Plan) u diyaariso mustaqbalkaaga
- Marka aad 18 jir gaarto waxaa lagu qoondayn doonaa lataliyaha PA

Lacagta

- Gunno kaa caawisa in aad habaysato ama diyaarsato gurigaaga ugu horreeya
- Waxaan kaa bixin doonaa Canshuurta Dawladda hoose (Council Tax) ilaa aad 25 jir gaarayso
- Lacagbixin si aad uga qayb qaadata waraysiyada taageerada ah ama uga qayb gasho munaasabada qaran
- £75 laga bixiyo takhtarka ilkaha & rijeetooyinka ama daawooyinka lagu qoro
- Barnaamijka biilka biyaha ee loogu talagalay dadka ka baxa daryeelka dawladda -

Waxbarashada, Shaqada & Tababbarka

- Xarun Bar Keliya (One Stop Shop) laga bilaabo 18 jir si lagaaga caawiyo qorista taariikhda waxbarashada iyo shaqada (CV), isku diyaarinta waraysiga, raadinta shaqada, fursadaha xirfad barashada iyo tababbarka
- 16– 18 jir - Dugsi dalwaddii ah ama kumbiyuutar si lagaaga taageero waxbarashada dheeraadka ah iyo sare
- Helitaanka shaqaale gooni ah oo jooga Xarunta shaqada (Jobcentre) oo loogu talagalay dadka ka baxa daryeelka dawladda
- Taageero ka bixiya waraysiyada shaqada, oo ay ku jirto isku diyaarinta safarka iyo dharka
- Deeqaha lacageed ee waxbarashada
- Faa'iidooyinka dhiirrigeliya Tababbarka
- Bixinta lacagta dalbashada loo diro jaamacadda
- Fursadaha khibrada shaqada ee ka dhex jira Kawnsalka Xaafadda Hartlepool